

Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Boston,

Iyada oo la soo saaray warar ku saabsan hergebka-dabeysaha, Waxaan rabnaa inaad ogaato inaan xaaladdan si dhab ah u qaadaynay, oo aan hadda qaadaynayno tallaabo dagaal si loo yareeyo faafitaanka Fayruskan. Waa mudnaanteena ugu sareysa inaan qaadno tallaabooyinka iyo taxaddarrada loo baahan yahay si aan magaaladeena, xooga shaqaalaha iyo bulshadeena u helaan nabadgelyo. Waxaan fahamsanahay kalsooni darrada ka jirta beesheena sida aan ula tacaalno mashaakilkan caafimaad ee guud ee bulshada oo si dhaqso ah isu badalaya, laakiin waxaan rabnaa inaad ogaato taas inaad tahay Duqa Magaalada iyo Kormeeraha Guud ee Dugsiga, waxaa naga go'an inaan sameynno wax kasta oo aan kari karno si aan kuu ilaalinno oona kula socodsii.

Magaalada oo dhan, madaxdeena caafimaadka iyo nabadgelyada dadweynaha ayaa qaadata tillaabo aad u ballaaran oo loogu diyaargaroobayo dhammaan xaaladaha ku lug leh hergebka-dabeysaha. Dadaallada loogu diyaar garoobayo badbaadin iyo jawaabcelin wax ku ool ah waxay bilaabatay Janaayo, waana sii socotaa in la isku hagaajiyo oo loo sii daro sidii loogu baahdo.

Fadlan faham in ficilada qaarkood ee aan qaadno ay carqalad noqoni karto, laakiin ay lagama maarmaan tahay in dadka Boston laga dhigo kuwo caafimaad qaba iyo nabadgelyo. Goor dhaw, waxaan go'aan ku gaarnay in si ku meel gaar ah loo xiro sedexda xarumood ee Dugsiga Eliot K-8 ee Dhamaad Waqooyiga taas oo sababay saadaasha kiis togan ee hergebka dabeysaha laga helay qof arday ahayn oo ka tirsan bulshada dugsiga. Go'aanka lagu xirayo dugsiga ma ahan mid aan si fudud u qaadno waayo waxaan aqoonsan nahay saameynta weyn ee ay ku yeelan karto ardayda, macallimiinta iyo shaqaalaha, iyo bulshada weyn. Waqtigaan, waxaan qorsheyneynaa inaan dib u furno dhammaan seddexda goobood ee Dugsiga Eliot Khamiista, Maarso 19, 2020. Inta lagu jiro waqtigan, dhismayaasha dugsiga iyo basaska will waxay helayaan nadiifin dhameystiran, kalkaaliyayaasha caafimaadka bulshada ayaa sii wadaya inay qiimeeyaan khatarta maadaama ay raadinayaan dhamaan xiriirada dhow ee shaqsiyeed, waxayna dadka ku xiraan baaritaan iyo daryeel hadii loo baahdo..

Fadlan la soco haddii aan u baahano inaan gaarno go'aanka ah in dugsi la xiro sabab la xiriirta kiis fayras ah oo la xaqiijiyey, waxaan isla markiiba la socodsiiin doonaa shaqsiga dugsiga bulshada.

Waqti xaadirkan, waxaan diirada saareynaa xakameynta faafitaanka fayraska, waana sababtaas waxaan u weydiisaneynay dhammaan deganeyaasha inay bartaan xaqiiqooyinka ku saabsan sida aad ku ilaalin karto naftaada, qoyskaaga iyo bulshadaada nabadgelyadooda. Liiska talaabooyinka fudud ee aad qaadi karto, fadlan booqo: boston.gov/coronavirus.

Mudnaanteena koowaad ayaa ah inaan dadka Boston ku hayno nabadgelyo iyo caafimaad. Waxaan rajeyneynaa in markaan qaadno talaabooyin ka hortag ah, inaan yareyno saameynta coronavirus in Boston. Waxaan sii wadi doonaa kormeerka xaaladda si dhaw ayaanan kula socodsiiin doonaa inta aan sii wadnay barashada.

Si daacad ah,

Duqa magaalada Walsh iyo Kormeeraha guud Cassellius